## Talobixinta Qaran ee Tabaha Argagixisada

# Faafinta

www.dhs.gov/advisories **TAARIIKHDA LASOO SAARAY:** Arbaca, Janaayo 27, 2021

## Soo koobid

Siihayaha xilka Wasiirka Nabadgalyada Dalka Hooyo , wuxuu soo saarey Faafin ku saabsan Talobixinta Qaran ee Tabaha Argagixisada (NTAS) iyadoo ay kajirto jawi halis khatareed guud ahaan Dalka Mareykanka, ooy DHS aaminsan tahay inay sii jiri doonto usbuucyada daba socda guushii ay ku dhamaatay Damaashaadka caleemasaarka Madaxweyne. Xogtan ayaa soo jeedinaysa inay qaar ka mid ah kuwa xagjirnimada rabshadaha wata ee fikirka ku dhisan ay diidmo ka muujinayaan ku dhaqanka awoodda dawladda xilliga isbadalka Madaxweyne, iyo sidoo kale cabashooyin la filayo ooy sii kicinayaan sheekooyin been abuura ah, ayaa dhici karta inay sii abaabulaan kicin ama dambiyo galid .

## Mudada

**Lasoo saarey:** Janaayo 27, 2021 at 11:00 A.M. ET
**Dhamaanaya:** April 30, 2021 at 1:00 P.M. ET

## Faahfaahinta

- Guud ahaan 2020, Rabshad-wadyaasha Xagjirayaasha Gudaha (DVEs) waxay beegsadeen shakhsiyaad leh aragtiyo kasoo horjeeda iyagoo adeegsanaya Badbaadada xeerka koobaad ee waxka-badalka qaranka, dhaqdhaqaaq aan rabshad lahayn. DVE ga oo arrimo badan ku dhiirigalsan, sida cadhada xayiraadda COVID-19 , Natiijada doorashada , iyo isticmaalka xoogga wata ee booliiska ayaa shirqoolay oo mararka qaarkood sababay weeraro loo geystay Xaruumaha dawladda.
- Xiisad soo jireen ah oo jinsi iyo mid qowmiyadeedba ah— ooy ka mid yihiin kasoo horjeedka Socdaalka—ayaa dabada ka waday weerarada DVE da, sida toogashadii 2019 ee El Paso, Texas ooy ku dhinteen 23 qof.
- DHS waxay ka walaacsan tahay xiisadahaas rabshadaha wata inay sii jiraan sannadkan 2021 oo dhan iyo in qaar ka mid ah DVE yadu ay suurtowdo inay dhiirigalin ka helaan dhacdooyinkii xadgudub ee Janaayo 6, 2021 lagu galay daarta Barlamaanka Daarta US Capitol ee Washington, D.C. si loo bartilmaamaysto xildhibaanada la doortay ee dalka iyo xaruumaha dawladda.
- DHS waxay kasii walaacsan tahay Kooxaha Xagjirka ah ee Dalka ku korey (HVEs) oo ku dayda argagixisada dibadda, oo sameeyay saddex weerar ay ku bartilmaameedsadeen saraakiisha dawladda 2020 kii, inay wali yihiin khatar sii jiridoona.
- Hanjabaadaha rabshada wata oo ka dhanka ah Kaabayaasha muhimka ah, sida Korontada, War-isgaarsiinta iyo kuwa daryeelka Caafimaadka, kor ayay u keceen rabshadaha xagjirku sannadkii 2020 , iyagoo eedda ficilkooda saaraya macluumaad khaldan iyo aragtiyo shirqoolsan kuna saabsan COVID-19 .
- DHS, iyo sidoo kale wakaaladaha Federaalka iyo hay'adaha la hawlgala sharci fulinta, waxay sii wadi doontaa inay sameyso taxaddarro lagu ilaalinayo dadka iyo kaabayaasha dhaqaalaha ee Mareykanka oo dhan.
- DHS waxaa ka go'an inay hor-istaagto rabshada iyo hanjabadaha looga dan-leeyahay cabsigalinta ama khasbidda bulsho gaar ah iyadoo lagu salaynayo Diintooda, Jinsigooda, Qowmiyaddooda, Aqoonsigooda ama Aragtidooda Siyaasadeed.
- DHS waxay dhiirigalinaysaa Gobolada, Deegaanada, Qabaailka, iyo ka qayb galayaasha amniga dalka Hooyo inay sii wadaan mudnaan siinta tallaabooyinka amniga ciidanka, gaar ahaan agagaarka xaruumaha dawladda, si loo badbaadiyo dadweynaha iyo kaabayaasha muhimka ah.

## Noocyada Talobixinta

### Faafinta

Wuxuu sharaxaa waxa hadda soo kordhaya ama isbadalka guud ee la xiriira hanjabaadaha argagixisada.

### Digniin Kor-looqaaday

Waa digniin lagu kalsoon yahay oo ah hanjabaad argagixiso ka dhan ah dalka Mareykanka.

### Khatar Dhaw

Waa digniin lagu kalsoon yahay, oo caddeyn wadata iyo argagax iyo hanjabaad soo socota oo ka dhan dalka Mareykanka.

## Sideed uga gacan gaysan kartaa

- Waxaan ka codsanaynaa dadweynaha inay soo sheegaan haddii ay arkaan dhaqdhaqaaq shaki leh iyo hanjabaad rabshado wata, sida dhaqdhaqaaqa la xiriira baraha internetka , oo ku aadan hay'adaha fulinta sharciga deegaanka, Xafiisyada FBI da, ama Xaruunta Isugaynta Deegaanka.
- Khiyaarkaaga ayaa wax badali kara. Dooro dariiqayada rabshad la'aanta inaad ku cabirto codkaaga in la maqlo iyo inaad taageerto saaxiibadaa iyo reerkaagaba inay sidaa si la mid ah sameeyaan.
- Jaaliyaduhu waxay ugu xoog badan yihiin markayna kala qaybsanayn: Ku xooji Jaaliyaddaada idinkoo si wada jir ah u hor-istaagaya rabshadaha.

## U Diyaar Garow

- Iska ilaalinta meelaha dadku ku badan yahay, sida mudaaharaadka, ayaa ugu amni badan marka la eego cudurka neefmareenka ah xaaladihiisa. Hase yeeshee, haddiiba aad ka qayb galayso mudaaharaad samee si daggan, aamin ah, iyo adigoo xiran Maaskarada.
- Masuul ka noqo nabadgalyada naftaada. Hubso hareerahaaga iyo shaqaalaha amniga. Wado xiriirada deg degga ah iyo sidoo kale kuwa caafimaadka iyo macluumaadka kale eed u baahan tahay.
- Xiriiri, Qoorshee, Tababar, iyo Warbixin samee si aad u diyaariso ganacsiyada & shaqaalaha.

## La soco

- Hay'aadaha Deegaanka, Gobolka, iyo Federaalka waxay bxinayaanmacluumaad sugan oo ku saabsan khataraha soo baxaya markastoo xog siyaada ah la aqoonsado. Dadweynaha waxaa algu dhiiri galinayaa inay maqlaan saraakiisha sharci fulinta deegaanka iyo sugidda amniga bulshada.
- Sannadkii hore, DHS waxay usoo saartay dadweynaha Qiimaynta Hanjabaadda Dalka Hooyo lagu baarayo jawiga halista ilaa sannadka 2021.
- DHS Lexicon ee Argagixisada waxaa laga helayaa eray-bixinta DVEs yada iyo HVEs yada.

**Haddii aad wax aragto , Wax Sheeg™.**
**Macluumaad dheeri ah, siyaaro www.dhs.gov/seesay.**

Talobixinta Qaran ee Qaabka Argagixsadu waxay dadka Mareykanka ah siinaysaa macluumaad feejignaan leh oo ku saabsan khataraha Amniga Waddankooda. Macluumaad dheeri ah waxaa laga helayaa www.dhs.gov/advisories. Moobaylkaaga ku hel waxa soo kordha: www.twitter.com/dhsgov

*Haddii aad wax aragto , Wax Sheeg™. Waxaa ogolanshaha isticmaalka erayadaas bixiyay Hay'adda Gaadiidka Magaaloyinka Waaweyn ee NY.*